Hagaha Waalidka: U Diyaarinta Ilmaha Qalliin ama Hawl Caafimaad

Waxaan u-soo-dhawow Swedish Medical Center. Waxaan dhawraynaa inaan ku siino adiga iyo ilmahaaga daryeelka ugu fiican. Himiladayada waa in aad waayo aragnimo fiican oo dhinac kasta ah kala kulanto Swedish.

Si aad nooga gargaarto taas, waxa jira tiro waxyaabo la rabo inaad ogaato oo samayso si aad ugu diyaariso ilmaha qalliinka ama hawsha caafimaad. Waxaaad fadlan raacdaa tallaabooyinka soo socda:

1. Si taxaddar leh u akhri qoraalkan waxaaadna fiiro gaar ah siisaa cuntada ka horrayasa qalliinka iyo tilmaamaha ku saabsan daawooyinka.
2. Wakiil ka socda Swedish Medical Center ayaa ku soo wici doona:
   - Si uu kugu qoro cisbitaalka
   - Ballan telefoon oo jiifitaanka ka hor ah ka ah qabso kalkaalisada sajilan ee goobta cisbitaalka Swedish ee aad qalliinka ama hawsha caafimaad ku gelayso
3. Haddii aad farriin taleefoon ah ka hesho Swedish, fadlan si dhakhso ah uga soo jawaab. Haddii aad rabto inaad la xidhiidho Swedish mar hore sii aad isku qorto ama ballan ugu qabsato jiifitaanka ka hor, waxaaad fadlan soo wacdaa lambarka hoose.
4. Wac xafiiska maaliyadda (fiiri hoos), haddii aad qabto su'aalo la xidhiidha caymiska ama kharashka qalliinka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaaad booqataa www.swedish.org qaybta adeegyada qalliinka "surgical services" ama bukaanka "for patients."

Waxaa kuu ballansan inaad qalliin ku yeelato:

- ☐ Xarunta Isbitaalka Ballard (Ballard Campus)
- ☐ Xarunta Isbitaalka Cherry Hill (Cherry Hill Campus)
- ☐ Xarunta Isbitaalka First Hill (First Hill Campus) – Xarunta Dhexe ee Isbitaalka (Main Hospital)
- ☐ Xarunta Isbitaalka First Hill – Machadka Xanuunka Lafaha (Orthopedic Institute)

Goorma iyo Halkee Ayaan Imaadaa

Xafiiska dhakhtarkaaga ayaa ku siin doona taariikhda iyo wakhtiga aad imanayso cisbitaalka. Waxaad kartaa inaad waxyaabahan hoos ku qorto xusuus ahaan.

Taariikhda: _____

Wakhtiga Imaatinka: _____

Nidaamka Cuntada Qalliinka Ka Hor

Wakhtigii ugu dambeeyay ilmahaygu cunto adag cuno: _____

Wakhtigii ugu dambeeyay ilmahaygu cabo caanaha qasaca, caanaha naaska ama cabitaan aan lahayn midab: _____

Wakhtigii ugu dambeeyay ilmahaygu cabi karo cabitaan aan lahayn midab: _____

Khariidad leh tlimaanta iyo meelaha baabuurta la dhigto ayaa baqshaddan ku jira. U aad Sajilaada Bukaanka arrimaha Qalliinka iyo Jiifitaanka Ka hor.

	Xarunta Isbitaalka Ballard (Ballard Campus)	**Xarunta Isbitaalka Cherry Hill (Cherry Hill Campus)**	**Xarunta Isbitaalka First Hill (First Hill Campus) – Xarunta Dhexe ee Isbitaalka iyo Machadka Xanuunka Lafaha**
Taleefoon:	206-781-6245	206-320-4116	206-386-2997
Faakis:	206-781-6110	206-320-4390	206-386-2992
Maaliyadda:	206-781-6225	206-215-2310	206-215-2310
Taleefoonka bilaashka ah ee dhammaan xarumaha isbitaalka:	1-866-851-5111		

SWEDISH

Qalliinka ama Hawsha Caafimaad iyo Ilmahaaga

Cisbitaalka Swedish, waxaanu ognahay in qalliinku cabsi gelin karo carruurta. Taas weeye sababta aanu ugu dedaalayno in aan waayo-aragnimada dhammaanteed ka dhigno mid quman intii suurtagal ah. Waxa laguugu ballan qaadi karaa in ilmahaagu uu ka helo daryeel shaqaale aad u tababaran oo adeegsanaya tiknoolajiyo caafimaad oo sarraysa — taasoo dhammaan ku dhacaysa jawi saaxiibtinimo.

Khabiirada ku Takhasusay Nolosha Ilmaha

Takhasusyada Nolosha Ilmaha waxay qayb ka yihiin kooxda daryeelka caafimaadka. Shaqadoodu waa inay gargaaraan ilmahaaga u diyaarintiisa qalliinka qaab ciyaareed oo dabiib ah. Haddii aad rabto inaad la hadasho khabiir ku takhasusay nolosha ilmaha, wac 206-386-6283.

Swedish waxay taageertaa carruurta iyo qoysaskooda iyada oo adeegsanaysa dhakhtarada takhasuska ilmaha cisbitaalka, takhasusyada suuxitaanka, kaalkaalisada carruurta, takhasusyada nolosha ilmaha, farmashiistayaasha carruurta, iyo shaqaalaha bulshada carruurta. Ilmahaagu waxaa kale oo geli karaa qolalka ciyaaraha ee qaybaha qalliinka.

Waxaad ka caawini kartaa u diyaarinta ilmahaaga hawsha caafimaadka adiga oo akhriya baqshadan oo raaca fariimaha ku jira.

- Waayo-aragnimada cisbitaalka waxay ka billaabmaysaa ballanta jiifitaanka ka hor. Muddadaas wicitaanka telefoonka, kalkaaliso ayaa ku warsan doonta si aad u buuxiso jaartada cisbitaalka ee ilmahaaga, oo laguugu sharxo waxaad filanayso lagaagana jawaabo wixii su'aalo aad qabto. Fadlan waxaad waraysiga u soo qaadaa dawooyinka ilmahaaga.
- Haddii aad rabto, waxaad soo mari kartaa xarunta qalliinka, qaybta carruurta ama qaybta daryeelka khaaska. Barashada cisbitaalku waxay yaraynaysaa kadeedka aad la kulmi kartaan adiga iyo ilmahaagu maalinta qalliinka. Waxaa tusmada la qabtaa Isniinta illaa Jimcaha. Ka wac takhasusyada nolosha ilmaha 206-386-6283 haddii aad rabto in ballan laguu qabto.
- Maalinta hawsha qalliinka ilmaha waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foomamka oggolaanshaha oo aad la kulanto khabiirka ku takhasusay suuxinta. **Waalidka ama wakiilka sharciga waa inuu joogo maalinta hawsha qalliinka.** Caddaynta wakiilnimada sharciga ah waa inuu qofku wataa haddii aanu ahayn waalidkii dhabta ahaa ee ilmaha.
- Si laguugu oggolaado inaad culayska saarto ilmahaaga bukaanka ah, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad qabanqaabsato daryeelka carruurtaada kale. **WALAALAHA ILMAHA LOOMA OGGOLA GOOBAHA QALLIINKA.** Hal qof oo daryeel bixiye ah oo weyn oo keliya ayaa soo raaci kara ilmaha inta ay socoto hawshani. Laba qof oo weyn oo daryeel bixiyayaal ah ayaa la joogi kara ilmaha markaad u diyaarinayso inaad u qaado guriga.

Fariimo Muhiim ah

Qalliinka Ka hor:

- ☐ Wac dhakhtarkaaga wax qalaya haddii ilmahaagu caafimaadkiisa wax iska beddelaan, oo ay ku jirto tahay hargab, ifilo, qandho, infekshanka kaadi-mareenka, shuban ama infekshan kale.
- ☐ Akhri fariimaha cuntada qalliinka ka hor.

Maalinta qalliinka:

- ☐ U qubee ilmahaaga oo ka dhaq timaha ka hor intaanad keenin cisbitaalka. Habeen ka hor ayaa fiican.
- ☐ HA u oggolaan ilmahaagu inuu marsado maykab (isqurxin) ama inuu isticmaalo alaabta la isku qurxiyo sida buufiska timaha, cadar, jeel, cadarka xiirashada, kareemada wejiga, saliid, looshin ama kondhishinarka timaha. Waxaad isticmaashaa saabuun iyo shaamboo oo keliya.
- ☐ Hubi in ilmahaagu raaco fariimaha cuntada ee qalliinka ka hor (fiiri dhabarka). Haddii fariimaha aan la raacin, hawsha ama qalliinka waa la baajin doonaa waxaana suurtagal ah in la buriyo.
- ☐ Cisbitaalka ku tag wakhtiga lagaa siiyey xafiiska dhakhtarkaaga qalliinka.
- ☐ Haddii ilmahaagu isticmaalo daawada la isku-buufiyo ee xiiqda, hore u soo qaad.
- ☐ Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad u soo qaadid cisbitaalka ilmahaaga bustihiisa gaarka ah ee badbaadada, xayawaanka la cufay, iwm. Haddii ilmahaagu isticmaalo dhalo gaar ah, caanaha qasaca ama kadaabada (sida Playtex Nurser), fadlan hore u soo qaad.
- ☐ U soo xidh ilmahaaga dhar dabacsan, oo raaxo leh.
- ☐ Kaga kaalay guriga dhammaan waxyaabaha qiimaha leh, oo ay ku jiraan dahabka iyo waxyaabaha la xidho maalin kasta.
- ☐ Xusuuso in aad ku talogasho wakhti aad baabuurka meel ku dhigato (fiiri khariidadda ku jirta baqshada).

Fariimaha Daawada Qallinka Ka hor

Aan ka ahayn marka uu dhakhtarka, khabiirka ku takhasusay qalliinka iyo suuxitaanku uu ku faro, fadlan ilmahaagu ha raaco tilmaamaha hoose ee qaadashada daawada qallinka ka hor.

Hal toddobaad qalliinka ka hor:

JOOJI qaadashada dhammaan asbiriinka iyo dhammaan dawooyinka uu ku jiro asbiriinku, sida Anacin, Excedrin ama asbiriinka carruurta.

Laba maalmood qalliinka ka hor:

JOOJI qaadashada dhammaan da-wooyinka “non-steroidal”, iyo kuwa lagu daweeyo nabarada, sida Advil, Arthrotec, Aleve, DayPro, Feldene, Ibuprofen, Indocin, Motrin, Naproxen, Naprosyn, Orudis, Relafan, Voltaren iyo Vicoprofen.

Subaxda qalliinka ilmahaaga:

Hubi inuu ilmahaaga ku qaato DHAMMAAN dawooyinkii kale ee caadiga ah ee loo qoray kabasho biyo ah. Haddii ilmahaagu isticmaa-lo daawada la isku-buufiyo ee neefta, ha qaato una soo qaad cisbitaalka.

8 saacadood gelitaanka ka hor	**KA JOOJI** ilmahaaga cunista cuntada adag. Waxaad u oggolaataa sharaabka. **MAYA CUNTO** **MAYA LOZENGES** **MAYA XANJO**
6 saacadood gelitaanka ka hor	**JOOJI** siinta ilmahaaga cabitaanka aanad wargeys ka dhex akhriyi karin. *Tusaalooyin:* dhammaan noocyada caanaha oo aanay ku jirin caanaha naasku, juuska leh xabuubka, iyo caanaha qasaca. **KU WAD** in aad u oggolaato caanaha naaska iyo shaarka aan lahayn midabka ee aad wargayska ka dhex akhriyi karto. *Tusaalooyin:* 7-up, Gatorade, jello aan wax ku jirin, juuska tufaaxa ee aan lahayn xabuub. **MAYA CAANO** **MAYA CAANAHA QASACA** **MAYA JUUSKA LEH XABUUBKA**
4 saacadood gelitaanka ka hor	**JOOJI** caanaha naaska.
2 saacadood gelitaanka ka hor	**JOOJI** in aad ilmahaaga afka wax ka siiso aan ka ahayn daawo sida uu kugu amray dhakhtarkaagu. **MAYA BIYO** **MAYA CABITAAN AAN MIDAB LAHAYN**

Fariimaha Cuntada ee Qalliinka Ka Hor

Iyada oo uu dhakhatarka ilmahaaga, takhasusyada suuxitaanka iyo qallinku kugu amray mooyaane, ilmahaagu waa inuu raaco fariimahan cuntada ee ka hor qalliinka. Haddii fariimaha aan la raacin, hawsha ama qalliinka waa la daahin ama waxaa suurtagal ah in la buriyo.

Qolka Raysashada

Qolka raysashada, ilmahaaga waxa daryeeli doona kalkaalisooyin si gaar ah u tababaran. Qaddarka wakhtiga ilmaahaagu ku raysanayaa waa kala duwan tahay. Waxaan fahamsanahay sida ay muhiim ugu tahay ilmahaaga raysashadiisa raaxadaada iyo taageeradaadu, si aad u aragto ilmahaaga sida ugu dhakso badan ee suurtagal ah. Saaxiibada iyo qoyska waxay soo wici karaan 206-386-2150 ama ka eegi karaan miiska macluumaadka qallinka ee loobiga weyn ee cisbitaalka wixii cusboonaysiin ah qalliinka kaddib.

Joogitaanka Cisbitaalka

Haddii ilmahaagu ay qorshaysan tahay inuu joogo cisbitaalka qalliinka kadib, waxaan ku dhiirigelinaynaa inuu qof weyn la joogo dhakhtarka habeenkii muddada joogitaanka.

Daryeelka xanaanada carruurta lagama helo Swedish. Carruurta la dhalatay ma ay joogi karaan habeenkii qolka cisbitaalka ay ilmaha ku jiraan. Saacadaha booqashada ee bukaanku waa 7-da subaxnimo ilaa 9-ka habeenkii. Walaaluhu waxay soo booqan karaan wakhtiyadan; carruurta ka yar 12 waa inuu la socdo qof weyni.

Qorshaynta Ku Noqoshada Guriga

Weydii xafiiska dhakhtarkaaga qalliinka daryeelka ilmaha ee guriga hawsha qalliinka kaddib. Maalinta la qorshaynayo in ilmahaagu uu guriga tago (ama maalinta hawsha qalliinka ama joogitaanka bukaan-jiifka kaddib), adiga ama qof weyn oo kale oo ama awood u leh waa INUU joogaa si uu ilmaha guriga ugu qaado. (Qorshaha hawsha qalliinka waa la burin karaa haddii ilmuhu aanu la socon qof weyn maalinta hawsha.) Carruurta MA kaxaysan karaan baabuur keligood ama kuma socdaali karaan bas. Waxay qaadan karaan tagsi iyada oo uu la socdo qof weyn. Dhammaan bukaanka, da'da ay doonto ha ahaatee, waa inuu la joogaa qof habeenkaas hore guriga hawsha qalliinka ama jiifitaanka bukaan-jiifka kaddib.

Jawaabaha Su'aalahaaga

Waxaannu rabnaa inaad dareento in aad qayb ka tahay oo lagu wargeliyey. Haddii aad qabto su'aalo ama aad wallaac ka qabto wax la xidhiidha qalliinka ilmahaaga ama hawshiisa caafimaad, fadlan ha ka gaabsan in aad soo wacdo lambarada ku yaal sanduuqa hoose.

LAMBARADA TELEFOONADA

Xarunta Jiifitaanka Ka Hor
206-386-2997
Suuxitaanka (Anesthesia)
206-215-3656
Khabiirka ku Takhasusay Nolosha ilmaha
206-386-6283

©
2009 SWEDISH HEALTH SERVICES PEDS-06-06223 ESI 60383
R-6/09